

HUBINTA AQOONSIGA IYO JOOGITAANKA WADANKA



Booliska sharci umalaha inuu hubiyo ama baadho aqoonsiga qof kasta oo maraya waddada.

Lakin waa xaalado gaar ah sida kuwan hoos kuqoran :

- Haddii uu jiro tuhun **danbi ah**.
- Amarka soo baxay dawlada sarre **in la hubiyo aag ama goob mudo kooban**.
- **Aagaga xuduudaha ujira** ilaa 20km Istayshanada, tareenada, garoomada diyaaradaha, dekadaha maraakiibta.
- Haddii ay jirto tilmaan cadaynaysa qofka inuu yahay **ajaanib** sida Afka uu ku hadlayo (luuqada) jariirad afka qalaad kuqoran, lambarka diwaanka gaadhiga (Taarikada) uu wato.



Dokumentiga aqoonsiga nooc ee ayaan dhiibi karaa ?

Qofkaajanabiga ah :

Kaarkaaga degenaanshaha (Lafta aqoonsiga) Risibiseega, dal ku gal sax ah, (Fiisaha) Risibiseega qaxootiga oo sax ah.

- **Waxa cadayn kuu nogon kara warqad kasta**, fOo uu ku yaal Magacaaga iyo sawir kaaga.



Fiirogaar ah : Haddii ay dhacdo baaritaan (jeekin) hubinta gaadiidka safarka dhexdiisa, baska ama tareenka isagoo aan haysan tigidhka lagu safro, waa mamnuuc in uu baxsado, inta aan Booliska iman, hadi kale waxa uu mutaysan doona jeel 2 bilood ah ama ganaax lacag dhan 7500 euros



Hadad diido inaad dhiibtid dokumenti gaaga aqoonsiga maaha danbi !



Waxa danbi ah inaad dhiibatid dokumenti been ah ama (faalso) ah !

Maxad samayn kartaa ee macquulka ah marka aad Boolis ku qabto ?

- Isadkaynta ama isdifaaca dhaaf, **isdaji si asluubleh ujoog**.
- Isku day inaad **garatid**, waddada, lamabraka, iyo dukaanka ama makhayada, maxadada, lagaa ag qabtay, xasuuso goor sheegta intay ahayd (saacada.)
- **Garo nooca ciidanka ee ku qabtay** (Booliska, Jandaaranka, CRS, PAF....) hadii aad xasuusan kartid lambarka RIO askariga kaga qoran laabtisa (xabadka) waa 7 Lambar.
- **Hadi uu boolisku gacan ku qaado**, iga daa dheh ha idilin, oo cod dheer ku dheh adigoo kucelcelinaya « Vous me faites mal » waad i xanuunisay ... waad i xanuunisay ... aax.
- **Inaad ka duubtid filim waa la ogol yahay**, ama ka codso dadka ag dhow inay ka duuban tilifankooda askarta markay ku xidhayan.
- **Ha siin (passwordka) kalmada sirta aad ku gashid telefankaaga** ha siin askarta.



Boolisku xaq uma laha inay diidaan la duubo muqaal : Iyo inay jidh dil u gaystaan qofka

- Haddi aanay macquul ahayn caydaynta aqoonsigiisa, Qofka gaadh ka ah waxa lagayn karaa **xarunta Booliska**, waxana lahayn karaa muddo **4 saacadood** ah ugu badnaan si loo cadeeyo **aqoonsigiisa**.

Mudada gacanta Booliska uu kujiro qofku, haddi uu Boolisku awoodi waayo inuu cadeeyo aqoonsiga qofka, Waxa laga qaadi karaa sawiro, iyo in laga dhigo faraha.

- Muddada lagu jira haynta qofka, qofku waxa uu xaq u leeyahay in uu wacdo ama la xidhiidho qaraabadiisa, ama qofka uu rabo.
- Dhammaadka muddada haynta, Boolisku waxa uu bixinaya ama siinayaa warqado ay ku qoran tahay sababta loo soo xidhay qofka. Qofku waxa uu xaq u leeyahay in uu diidi karo saxeexida warqadaha la siiyay.